

## **Caawimaada Daynta Ardayda inta Lagu jiro COVID –19**

### **Muxuu Xeerka CARES u sameeyaa Daymaha Ardayda?**

Xeerka CARES wuxuu joojiyay lacag bixinta la qaado wuxuuna meesha ka saaray lacagaha dulsaarta ah lagasoo bilaabo Maarso 13, 2020 ilaa Sibteembar 30, 2020 kuwaasoo la xariira

- Daymaha Tooska ah ama
- Daynta Waxbarashada Qoyska ee Federaalka (Federal Family Education Loan (FFEL) oo ay hadda dadka ku leedahay Waaxda Waxbarashada ee Maraykanka.

### **Sidee ayaan ku ogaanayaa in dayntaydu tahay Dayn Toos ah ama daynta FFEL?**

- booqo barta <https://studentaid.gov/>
- ama wac adeeg bixiyahaaga
- ama Waaxda Waxbarashada ee Maraykanka ood ka wacayso 1-800-4-FED-AID (1-800-433-3243; TTY dadka dhagoolka ah ama maqalkoodu culus yahay 1-800-730-8913)

### **Ka waran haddii daynta mar horaba lagu waday aruurin?**

Markay yihiin daymaha uu qabanaayo Xeerka CARES, lacag aruurinta qasabka ah waa la hakiyay. Lacago kasta oo laga jarto gunnooyinka Social Security, gunnooyinka dadka ciidanka kasoo shaqeyay, canshuur dhaafyada, iyo la wareegida mushaharka waa in la joojiyaa ilaa laga gaaro Sibteembar 30, 2020. &nbsp;

### **Haddii aan joojiyo bixinta lacagaha ilaa laga gaaro Sibteembar 30, 2020, wali ma u qalmi doonaa dayn cafin?**

Markay yihiin daymaha uu qabanaayo Xeerka CARES, lacagaha lagaa rabay inaad bixiso lagasoo bilaabo Maarso 13, 2020 ilaa Sibteembar 30, 2020 waa la joojinayaa. Lacagaha la bixin lahaa bilahaas waxaa loo aqoonsanayaa lacago la baxshay sababo la xariira barnaamijka dayn cafinta xataa haddii aadan lacagahaas dhiibin.

Waxaa markii u danbaysay la cusboonaysiiyay Maayo 3, 2020

## **Qasab miyaa inaan codsado hakainta lacag bixinta haddii aan qabo daynta ardayga oo uu daboolo Xeerka CARES?**

Maya, Xeerka CARES wuxuu hakinayaa dhammaan lacagaha lagu qaado daymaha si ootomaatig ah. Shirkada ku siisay dayntaada ardayga ( shirkada aad u celinayso lacagta daynta ah) ayay ahayd inay kuusoo sheegto markay ahayd Abriil 10, 2020 in lacagahaaga daynta la joojiyay ilaa laga gaaro Sibteembar 30, 2020.

## **Ka waran haddii ay ahayd inaan lacagta si ootomaatig ah u baxsho ama lacag la iga goostay xili ay ahayd inaan la iga goosan intii lagu jiray waqtigaan la iigana goostay mushaharka, gunnada, ama canshuru dhaafka?**

Haddii aad si ootomaatig ah ku bixin lahayd lacagta si loogala baxo koontadaada baanka, markaas shirkada daynta kugu leh waa inay joojisaa lacag kala bixida koontadaada. Haddii aanay tani dhicin, waxaad codsan kartaa inay kuusoo celiyaan lacagta ay kaala baxeen inta u dhaxaysa Maarso 13, 2020 iyo Sibteembar 30, 2020.

Waxaad sidoo kale codsan kartaa in lacagta laguusoo cesho haddii mushahaaraadka laga goostay, canshuurtaada la jartay ama qayb kamid ah lacagtaada Social Security lagaa jartay kadib Maarso 13, 2020. Haddaad su'aalo ka qabto in canshuur celintaada federaalka la jartay iyo in kale, wac Kooxda Xalinta Ciladaha ee Waaxda Waxbarashada Maraykanka ood ka wacayso 1-800-621-3115 (TTY ga oo loogu talagalay dadka dhagoolka ah ama maqalkoodu culus yahay 1-877-825-9923).

Si kastaba ha ahaatee, tani waxay kaliya imaan kartaa haddii aad qabto dayn uu daboolayo sharcigu.

## **Haddii aad joojio bixinta qarashaadka dayntaan sabab la xariirta inaan qabo daynta ardayga oo uu daboolayo Sharcigu, wax dhib ah miyay u keenaysaa kalsoonidayda dayn qaadashada?**

Maya. Shirkada daynta kugu leh waa inaysan soo gudbin warbixin ah inaad ku fashilantay bixinta lacagta daynta oo ay ku qorayso warbixintaada daynta haddii aad joojiso bixinta lacagaha daynta inta u dhaxaysa Maarso 13, 2020 iyo Sibteembar 30, 2020. Taas badalkeed, waa inay ka muuqataa warbixinta daynta sida inaad lacagta ku bixinaysay jadwalka caadiga ah.

## **Ma haystaa wax dooroshooyin ah haddii aan hadda iska diiwaangelisay dugsi kadibna dilaacida fayraska COVID-19 igu qasabtay inaan dugsiga iska dhaaf?**

Haddii aad ka baxday dugsigaaga sabab la xariirta COVID—19, Xeerka CARES wuxuu doonayaa in la joojiyo Daymaha Tooska ah inta lagu jiro mudadada lacag bixinta ee aad dugsiga ka baxday.

Si aad u hesho caawimaad dhanka sharciga ah oo arimahaan la xariirta, fadlan la xariir xafiiska Legal Aid ee deegaankaaga.

**SEOLS: 1-833-288-2936**

**FRANKLIN iyo MADISON: (614) 241-2001 ama Taleefanka bilaashka ah 1-888-246-44420**

*LASC/SEOLS cidna kuma takoorto sabab run ah ama mid la mala awaalay oo la xariirta isirka, midabka, diinta, jinsiga, dookha galmada, aqoonsiga jinsiga ama dareenka, xaalada gurka, wadanka qofku ka yimid, naafada, da'da, asalka, ama inuu qofku kamid ahaa ciidanka milatariga marka la qoraayo, la daawaynaayo, ama uu ka qaybgalaayo barnaamijyadeena, adeegyadeena iyo shaqooyinkeena, ama hawlaheena shaqalaaysiinta iyo shaqada.*

